

Xarumaha PACE iyo PACE ee Wisconsin

(PACE and PACE Centers in Wisconsin)



PACE (Program of All-Inclusive Care for the Elderly) (Barnaamijka Daryeelka Dhammaan Loo dhanyahay ee Waayeeelka) waa barnaamijka daryeelka muddada dheer ee loogu tallogalay dadka da'da 55 iyo ka weyn. Waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo **caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka, daryeelka muddada dheer, iyo qoraalada daawada.**



Daryeelka muddada dheer—Adeeg ama taageero laga yaabo inaad u baahatid sababtoo ah hal ama ka badan oo kuwa xiggo:

- Aad qabtid naafonimo
- Aad tahay 55 sanno jir ama ka weyn
- Aad qabtid xaalad joogta ah ama waarta
- Aad caawin uga baahantahay howlo maalmeedka, sida labisashada ama qubeyska



Caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka—Adeegyada dhaqtarka, kaalisada, ama bixiyaha caafimaadka u qalma, oo ay ku jiraan:

- Ka hortaga cudurka
- Waxbarashada bukaanka
- Ways to get and stay healthy



Daawooyinka qoraalka ah— ku dar dhammaan adeegyada daawada Medicaid iyo Medicare. Iyo PACE:

- Waxaad heleysaa dhammaan qoraalada daawada oo loo marayo farmashiga PACE.
- Uma baahnid qorshaha daawada gooniga ah oo Medicare Qeybta D.

Yoolka PACE

Yoolka PACE wuxuu kaa caawinayaa daboolida baahiyahaaga daryeelka muddada dheer iyo yoolalkaaga shaqsiga.

- Dooro taageerooyinkaaga iyo adeegyada.
- Go'aanso sida aad u isticmaashid maalinkaaga.
- Go'aanso cida aad la nooshahay iyo meesha.
- Dareen ixtiraam iyo in si cadaalad ah laguula dhaqmay.
- Ku lug yeesho bulshadaada.
- Lahow asturnaan iyo dareen badqab.
- Xiriiro la yeelo qoyska iyo saaxibada.
- Yeelo caafimaadka suurtoogalka ah ee ugu fiican.



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

Sida PACE u shaqeyso

PACE waxay ku saabsantahay inay kuu helaan taageerada iyo adeegyada aad ugu baahantahay nolol maalmeedka. Waa kuwaan waxaad filaneysid:

Koox daryeel ee adiga ku taageero

Iyo PACE, koox dad ah ayaa kula shaqeeyo.

Kooxda daryeelkaaga waxaa ka mid ah:

- Adiga.
- Dhaqtarka PACE (ama dhaqtarka bulshada).
- Kalkaaliso diiwaangashan.
- Maareeye daryeel.
- Iskuduwaha xarunta PACE.
- Xiriiriyaha daryeelka guriga.
- Daaweeyayaasha jireed, shaqada, iyo madadaalada.
- Taqasuska cuntada.
- Xubin qoyska ah ama qof qaraabo ah (*iqtiyaar*).
- Xirfadlayaasha kale, waxay ku xirantahay baahiyahaaga, sida shaqaalaha daryeelka gaarka ah (*iqtiyaar*).

Ogow: Haddii qof ku sameeyo dooqyada sharciga matalaadaada, waxay kugula lug yeelanayaan PACE. Waxay hubinayaan in kooxdaada maqasho oo ixtiraamto codkaaga.



Adeegyada kuu ogolaanayo inaad guriga ku noolaato

Dhibaato malahan halka aad ku nooshahay, kooxda daryeelkaaga ayaa kaa caawin karo inaad heshid taageerada iyo adeegyada aad u baahantahay.

Fursada kaa caawineyso doorashada adeegyada iyo bixiyayaasha

Waxaad:

1. **Kala hadal kooxda daryeelkaaga waxa aad rabtid.** Kooxda daryeelkaaga waxay sameynayaan qiimeynta ay kugu bartaan. Waxay fiirinayaan haddii aad jeceshahay halka aad ku nooshahay hadda. Waxay sidoo kale ogaanayaan taageerooyinka aad u baahantahay si aad ugu noolaatid nolosha aad rabtid.
2. **La abuurayaan qorsho daryeel kooxda daryeelkaaga.** Qorshaha daryeelkaaga ayaa kuu dhaqaajinayo dhinaca yoolalka aad ku qeexdo qiimeynta.
3. **Ka dooro bixiyayaasha shabakada.** Markii aad iska diiwaangelisid PACE, waxaad ku soo biirtay managed care organization (ururka daryeelka la maareeyay). Waxay kaala shaqeynayaan inay kuu helaan daryeel muddo dheer iyo adeegyada daryeelka caafimaadka ee aad u baahato. Adeegyadaan waxaa ka mid ah gaadiidka, taageerada daryeelka guriga, cuntooyinka guriga la keeno, iyo wax badan. Waxaad dooratay adeegyadaada iyo bixiyayaasha, oo ay ku jiraan dhaqtar cusub oo hadda ah, ee shabakada ama dhinaca dooqa adeega shaqsigu hago.
4. **Heleysaa adeegyo iyo taageero.** Ururka daryeelkaaga la maareeyay ayaa kaa caawiyo raadinta iyo qorsheynta adeegyada aad ku dooratay gudaha xirmada faa'idada.

Ku maalgelinta hal barnaamij

PACE ayaa bixiso daryeelkaaga muddada dheer, caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka (oo ay ku jiraan ilkaha), iyo daawooyinka qoraalka oo loo marayo hal barnaamij. Sababtoo ah dhammaan adeegyada waxay ka qeybyihiin isla barnaamijka, way fududahay in la helo daryeel oo la isticmaalo faa'idooyinkaaga.

Raadi xarunta PACE ee kuu dhow

Gudaha Wisconsin, PACE waa dooq haddii aad ku nooshahay gobolada Kenosha, Milwaukee, Racine, iyo Waukesha. Xubnaha waxay ka helaan adeegyo iyo taageero badan xarunta PACE.

Warbixinta xiriirka ee xarumaha PACE ee Wisconsin:

Gobolka Milwaukee

1555 South Layton Blvd.
Milwaukee, WI 53215

Taleefanka: 414-385-6600

3220 W. Vliet St.
Milwaukee, WI 53208

Taleefanka: 414-231-4000

Gobolka Racine

5200 Washington Ave.
Racine, WI 53406

Taleefanka: 262-484-5100

Gobolka Waukesha

1801 Dolphin Drive
Waukesha, WI 53186

Taleefanka: 262-953-8550

Qoraalada:

Meesha laga barto wax badan oo ku saabsan PACE

Si aad wax badan uga baratid, fadlan booqo websaydka [Wisconsin Department of Health Services \(Waaxda Adeegyada Caafimaadka Wisconsin DHS\)](https://www.wisconsin.gov/dhs/familycare/pace.htm) ([dhs.wisconsin.gov/familycare/pace.htm](https://www.wisconsin.gov/dhs/familycare/pace.htm)) ama sawir koodhka QR.



Si aad u ogaatid haddii aad u qalantid, la soo xiriir:

- [ADRC deegaankaaga \(aging and disability resource center\) \(xarunta illaha gabowga iyo naafonimada\)](https://www.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm) ([dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm](https://www.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm)).
- [Tribal ADRC kaaga \(aging and disability resource specialist\) \(taqasuska illaha gabowga iyo naafonimada\)](https://www.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm) ([dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm](https://www.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm)).
- DHSFCWebmail@dhs.wisconsin.gov.
- Adeegyada Xubinta Medicaid ee 800-362-3002.

